

# TAXANAHA DHAXALREEB I/2020

Jeenawari – Abriil 2020 Ponte Invisibile Ed.


## ‘Hoodaar’ oo sharraxan: lafaggurid maanso



*Barmaamijka Weelaynta Suugaanta Afsoomaaliga iyo Ereyadiisa – somalicorpus.com.*

Jaamac Muuse Jaamac

Abriil 2019 [dib u eegid Abriil 2020]



Taxanaha Dhaxalreeb:

- [1] Jama Musse Jama, Juun 2005  
Layli Robot: Makiinad iswadda oo ciyarta Layli Goobalay
- [2] Cabdiraxmaan Faarax 'Barwaqo' iyo Mohamoud H. Nugidoon, Noofember 2005  
Qalabka iyo Suugaanta Qodaalka.
- [3] Cabdiraxmaan Faarax 'Barwaqo', Diisember 2005  
Mahadhadii Muuse Xaaji Ismaaciil Galaal.
- [4] Cabdiraxmaan Faarax 'Barwaqo', Jeenarweri 2006  
Kumaa ah Aabbaha Miisaanka Maansada Soomaaliyeed: ma Carraale mise Gaarriye?
- [5] Jama Musse Jama, Abriil 2007  
Tirada iyo habka tirsimo ee Afsoomaaliga.
- [6] Cabdiraxmaan Faarax 'Barwaqo', Meey 2007  
Miisaanku waa furaha kala asooridda badaha maansooyinka soomaaliyeed
- [7] Ibraahin Yuusuf Axmed "Hawd", Juun 2007  
"Dhulgariir" waa digniin culus
- [8] Khaalid Jaamac Qodax, Oktoober 2007  
Suugaan Xul ah iyo Abwaan Axmed Aw-geedi "Dheeraad"  
Maansoyahan mudh baxay!
- [9] Xasan C. Madar, Maarj 2008  
Raad ka mid ah raadadkii addoonsiga.
- [10] Aadam Xaaji Cali Axmed, Seebtember 2008  
Bandhig-buugeedka Caalamiga ah ee Hargeysa
- [11] Ayaan Maxamuud Cashuur, Oktoober 2008  
Toddobaadka Fanka iyo Suugaanta Soomaalida ee Landhan
- [12] Xasan C. Madar, Diisember 2008  
Ruwaanda: Xasuuqii boqolka maalmood
- [13] Mohamed-Rashiid Sheikh Hassan, Diisember 2008  
Art and Literature: The Other Weapon for Resistance
- [14] Kamaal Cabdillaahi Xuseen, Abriil 2009  
Iskaddaa sonkorta oo ka gaashaamo cudurka kaadi-macaanka noociisa labaad
- [15] Cabdiraxmaan Faarax 'Barwaqo', Noofember 2009  
Aqoontii iyo ibaxnimadii Soomaalida
- [16] Mohamed Obsiye, December 2010  
Somaliland's Search for Recognition
- [17] Jama Musse Jama, May 2012  
We lost a friend
- [18] Jama Musse Jama, Feeberwari 2015  
*Aqoon iyo Afgarad* waa murti ku habboon in maanta la isu sheego: Gorfeyn riwaayadeed
- [19] Jama Musse Jama, Seebtember 2016  
*Gorfeyn Sheeko: "Rooxaan", Shire Jaamac Axmed, 1973*
- [20] Jama Musse Jama, April 2020  
'Hoodaar' oo sharraxan: Iafaggurid maanso, Faarax Axmed Cali "Gamuute", 2018

Taxanaha Dhaxalreeb waa qoraallo kusoo baxa degalka redsea-online.com dhowr jeer si aan aan joogto ahayn sannadkii. Wuxuu isku dubbarida Jaamac Muuse Jaamac, waxana daabaca soo saarha Ponte Invisibile Ed. oo deggan Pisa, Italy.

Ka rogo si bilaash ah [www.redsea-online.com/e-books](http://www.redsea-online.com/e-books).

## 'Hoodaar' oo sharraxan: lafaggurid maanso

Jaamac Muuse Jaamac | jama@jamamusse.com

Sawirka jaldiga: Rashiid Sheekh Cabdillaahi "Gadhwayne", Faarax Axmed Cali "Gammuute", Siciid Jaamac Xuseen "Gacmuudi". Sawirka waxa qaaday Ciise Muuse © Xarunta Dhaqanka ee Hargeysa, 2018.

Sawirkan hoose: Jama Musse Jama, Cabdi Aadan Xayd "Qays", Maxamed Ibraahin Warsame "Hadraawi", Maxamuud Maxamed "Dheeg", Xasan Xaaji Cabdillaahi "Ganey", Maxamed Aadan "Dacar", Siciid Jaamac Xuseen "Gacmuudi" – Burco, 2018.



**'Hoodaar' oo sharraxan: lafaggurid maanso**  
Jaamac Muuse Jaamac<sup>i</sup>

*Dhif iyo hibo naadir lagu helo  
Ayaan ugu hiran Hadraawiye,  
Gammuute.*

**Sookoobid**

Saddex saaxiibbo ah, Faarax Axmed Cali "Gammuute", Rashiid Sheekh Cabdillaahi "Gadhwayne" iyo Siciid Jaamac Xuseen "Gacmuudi" ayaa xagaagii 2018kii soo booqdey saaxiibkoodii ay waqtiga dheer dad isugu dhawaayeen, Maxamed Ibraahin Warsame "Hadraawi", oo aanay in door ah la kulmin. Wuxuu ay ku soo booqdeen Hadraawi magaalada Burco, iyaga oo ka safriy Hargeysa oo ay saddexduba u joogeen Bandhiggii Buugaagta. Intii ay sii socdeen aad bay uga sheekaysaneen, jawiga Burco, ayaamo hore, iyo xaalladda ay kula kulmi doonaan. Wuxuu ay la soo joogeen maalintii oo dhan. Ka soo noqodkii safarkoodaas oo gaar u taabtay, iyo la kulankii *Geedka<sup>ii</sup>*, ayuu Faarax Gammuute ka allifey maansadan "Hoodaar".

**Hordhac**

'Hoodaar' waa maanso uu tirihey Faarax Axmed Cali "Gammuute"<sup>iii</sup>. Wuxuu uu tirihey saaxiibkii Maxamed Ibraahin Warsame "Hadraawi"<sup>iv</sup>. Wuxuu ay soo baxday bishii Julaay 2018ka, isaga oo ka qaybgelaya Bandhigga Caalamiga ah ee Buugaagta Hargeysa<sup>v</sup> kadib markii isaga, Rashiid Sheekh Cabdillaahi iyo Siciid Jaamac Xuseen ay Burco ku soo booqdeen Hardraawi. Maansada 'Hoodaar' waa astaamayn qofeed, mid fannaan iyo mid shaqsiba; waana sheeko-faneed soo bandhigaysa taariikh ay labada saaxiib soo wada mireen oo farxad, dammaanshaad, dhallinyaranimo, naxdin, werwer, dagaal, waayeelnilimo iyo dedaal ummadeedba lahayd, waqtii aad u dheerna soo taxnayd.

Hadraawi iyo Gammuute wuxuu ay saaxiibbo maansowadaag ahaayeen in ku dhow 50 sannadood. Hadraawi wuxuu Gammuute ku soo qaadayaa maansadiisii "Hambaber" (1981)<sup>vi</sup>, dadka qaarna u yaqaanniin "Hargeysi ma toostey!", tuduca odhanaya:

"Hobey-hobe hooda  
Durbaankiyo heesta  
Ku soo hogo-geyne  
Adaa hal-abuurka  
Tix-raaca ha'-leyda  
Ujeeddada hoose  
Hawaala yaqaane  
Horuu orod **Faarax**,  
Horweynta jiciirtay,  
Hadhaaga u jooji."

Mar kale Hadraawi maansada “*Fido*” (1982)<sup>vii</sup>, ee uu kaga hadlayo qaddiyadda Falastiin, Hadraawi wuxuu ku halqabsanaa, kuna soo noqnoqonayaa, Gammuute, waa na ka leh:

“**Faaraxoow** hal-yeygii  
Falasdiin dabkaw sidey  
[.]  
**Faaraxoow** gumeystii  
Waan-waanta faygiyo  
[...]  
**Faaraxoow** gumeystuhu  
Beri hore faquuqee  
[.]  
**Faaraxoow** Talaabiib  
Fir-ka-naxa habeenkii  
Iyo labada fiid-cawl  
Fooladdeedu waa weer  
Meydku waa is-feedh yaal”

Ma tira yara meelaha uu Faarax Gammuute maansadiisa kaga marag kacayo hibada iyo hoodada abwaannimo ee saaxiibkii Hadraawi. Tusaale, maansada *Aroor* (2015)<sup>viii</sup>, waxa uu Gammuute leeyahay:

“Suugaan ilhaam deexashada, iba darrooraysa  
Iyo arar **Hadraawow** laftiyo, dhuuxa ka iftiinta  
Asli dhalanku dheeraad sitoon, cidi astaynaynin  
Ood darar uneexaalihii, soo iliil marisay  
Yaad dhabaq ugbaadlayda iyo, ayda mayraciye  
Gacantiyo abwaanow xurmada, ubaxle kuu taagay  
[.]”

Maansada Faarax Gammuute ee “Birimagaydo<sup>ix</sup>”, waxa uu leeyahay isaga oo ka hadlaya saaxiibkii Hadraawi:

Isagaa galool mudhay  
Lagu maakubaayoo  
Gobannimo mullaaxdeed  
Iyo maydhaxdeedaba  
Loo sii makaawiga

Isagaan la marin karin  
Qof la miidho iyo godob  
Mashqaceeda sidatee  
**Ina Walanwal<sup>x</sup>** maantaa  
Malkaduu jiraa dheer.

Maansada *Gadhyaa*<sup>xii</sup>, Faarax waxa uu leeyahay:

Galayaxa hillacaad ku wadhi, Galalka Ciideede  
Godimada Togdheer baad xareed, gaalli ugu waabi  
Dirirkoo galaashaad ku furi, adhaxda Gaaroodi  
Oo Hara Garduur baad ka dhigi, daad galgalintiiye  
Gudgudaha sidiisaad arlada, gaydha marisaaye  
Maansadu godkay leedahiyo, gabay laguu daaye  
Gadalabe lib baan kuu hayaa, aanan gadi haynne  
Geeraarshe adigaan xurmada, kugu gunneeyaaye  
**Geed**<sup>xii</sup> **Walanwalow**<sup>xiii</sup> shaal galgala, saaray garabkaaga.

Mar kale maansada *Jalbeeb*<sup>xiv</sup> na waxa uu leeyahay:

Jalbeebta waxaan ku soo jaray  
Xurmadu ka jil roon jarraysimo  
Sagaar jimidh yari jalleecada  
Jaleelada lulan ku juuq dhawr  
Hormuud jamaloo dir Jaawe ah  
Ma jabe lagu guur jidaal dheer  
Dadkana wax ku jira dun jawhara  
Jarreeexada guurti laga jiro  
Anaa la jid maray nin jawr neceb  
Jinsiga **Ina Walanwal**<sup>xv</sup> jeer hore  
Galool ku jinjimiay jimiaday  
Gob waaya jirtuu ka joogaa

Waxa kale oo aynu soo qaadanynaa maansada *Gardhalad*<sup>xvi</sup>, oo uu Faarax ku leeyahay saaxiibkii:

**Geed Walanwalow**<sup>xvii</sup> duunka  
Inta hadimo loo gaystay  
Ee daanna soo gaadhay  
Sii goobitaankeeda  
Yaan laga gayoonayne

Marka laygu soo giirto  
Ee mici gamaarreydu  
Ay igu la goobtaane  
Igu dhabata goodaado  
[...]  
Yaan gadallabow dheegga

Iyo geesta aad joogto  
Garab ugu duggaalaaye.

Mar kale maansada Xayi<sup>xviii</sup>, Faarax Gammute waxa uu leeyahay:

Xudduntii lagu beero,  
Ee xidhiidh ka dhexeeyo,  
Gabay wuu ku xaydaaye;

Geeraar saw xaddigiisa,  
Laga yaabay xawaadda,  
**Geedka**<sup>xix</sup> looma xeraynin?

Han sarriigta xishoodka,  
Oon xumaan talinaynin,  
Oon wanaag ku xubeerin,  
Oo yaqaan xaq la sooro,  
Iyo xeerka la beego;

Oon hadday xabbad joogto,  
Qaayibayn xakamaynta,  
Iyo juuq xayiraada;

Oon bayuurta xajiinta,  
Iyo hooda xujaysan,  
Quusigooda xantoobsan;

Iyo Geedka xariirta,  
Hiyigaa xulanaaya,  
Ee xayaabada beegsan,  
Saw xilqaan lama siinin;

Iyo laab ka xallaatay,  
Xirigigaa lallabaynta,  
Baray xawlalmariidka,  
Labadaa ka xumbaynta;

Ee xaduurka magaalo,  
Duul xaraar-ku-butaystay,  
Ay ku xoogsanayaane,  
[...]  
Geed ayaan xanaftiisa,  
U dheg taegin xakaarka,  
Iyo xooftada suuqa,

Ay la xoorinayaane;

...

Dadnimoy nin xaqdhwarka,  
Kuu xabiibnimo looga,  
Sida Geedna ku xeerin,  
Oo ku taaran xannaano;

Weligiina xalaasha,  
Xaraan kuugu badhxaynin,  
Oon xaraashin damiirka,  
Kana dhawrsan xatooyo;

Cuurkan gawyada xoonsan,  
Ee ku xeeran gabboodka,  
Xusul buu ka mudhaaye;

...

Xikmadaan la sal gaadhin,  
Iyo fiiro xog laalan,  
Xirrib dhaaddan **Hadraawi**,  
Ayaa jeer xawilaada,  
Xayi loogu hubaaye;

Saw markuu xannibaada,  
Xayira ka adeego,  
Laga soo xigan maayo?

Ugu danbayn maansada Caymo<sup>xx</sup> waxa uu Faarax ku soo qaadanaya saaxiibkii Hadraawi:

Maansada cid sheed haabatiyo, curis yar mooyaane  
**Geedkaa**<sup>xxi</sup> caleentii mudnayd, loo cumaamadaye

Maansada 'Hoodaar' waxa ay kaga duwantahay halqabsigaa suugaanwadaagnimo ee ka dhxeeyay labada abwaan, iyadu waa hadiyad uu Faarax Gammute ugu talo galay saaxiibkii Hadraawi, kaga na sheekaynayo shaqsiyaddiisa iyo abwaannimadiisa. Maadaama ay ereyada uu Faarax adeegsaday aad u adagyihiin, waraaqdan waxa ay macnaysaa ereyadaas qaarkood, waxana ay sheegaysaa macnaha uu ereygu ugu jiro maansada. Ma aha sida ereygu uu ugu qeexan yahay qaamuuska, waa macnaha uu ereygu tuduca maansada ku samaynayo. Ereyada shakigu iga galayna waan kala sheekaysatay Faarax Gammute<sup>xxii</sup>. Ereyada qaarkood si loo fahmo waxa aan raaciyeey tusaale abwaan kale oo hore u adeegsaday, ama maahmaah ama murti kale oo ay ku jирто oo la isla yaqaanno<sup>xxiii</sup>. Mararka qaarkood macnaynta loo baahan yahay ma aha erey kaliya e odhaah laba ama in ka badan oo erey ah baa la macneeyey<sup>xxiv</sup>.

Hoodaar waxa xiise gaar ah u yeelaya sheekoooyinka dhaqanka ah ee ku jira, ama se dhacdooyin run ah oo uu abwaanku la kulmay. Faarax waxa uu maanso-ku-sheekaynta u leeyahay hibo. Mararka qaarkood waxa aan soo qaatay sheekada oo la soo koobay si uu u fududaado fahanka tuduca oo dhammi<sup>xxv</sup>.

Inkasta oo aan wax ka waydiiyey Faarax macnaynta, dadkale oo dib u eegay waraaqdani intii ay qabyoqoraalka ahaydna aan kala tashaday<sup>xxvi</sup>, haddana fahanka sharraxaadda iyo doorashada tusaaleyaasha aniga ayaa ka mus'uul ah.

Ugu danbayn baydka, aniga qiimeynteyda, ugu doorka roon, uguna habdhaca wanaagsan ee maansadu waa baydka 110-aad: "*Dhif iyo hibo naadir lagu helo*". Marka laga yimaaddo macnaha wayn ee uu sido baydku, waxa qurux badan sida xidhiidhiyaha '*iyo*' uu ula tiigsaday labada erey ee *dhif iyo naadir*, haddana iyada oo uu erey kale (*hibo*) u dhexeeyo, labada erey ee baydka dhammaystirayaana ay yihiin xaraf-raaca H-leyda. Qaabdhismeedka lammaanaynta laba magac oo isku xidhayo ereyga '*iyo*', haddana looga sii tallaabsanayo ereyo kale si maasada miisaankeeda iyo xaraf-raaceeda loo ilaaliyo, waa waxa quruxda u yeela maansada: <N1> iyo <XXXX> <N1>.

Tusaale:

- ***Halbeeg iyo noqon halhays*** ubad [Halbeeg iyo Halhays]
- ***Dhif iyo hibo naadir*** lagu helo [Dhif iyo Naadir]
- ***Higlo iyo kala firi galool*** hawd

Ka eeg faahfaahin isoggolaanshaha ereyga '*iyo*' ee maansadan cutubka soo socda.

### Rogaanrogga Maansada 'Hoodaar'

Maansada 'Hoodaar' waa 11-ley<sup>xxvii</sup>, Ha'lay<sup>xxviii</sup> ah oo baddeeda maansadu tahay *Dhaanto asali* ah<sup>xxix</sup>. Haddii lagu eego qaabaynta Gaammuute, dhaantada asaliga ahi waxa ay ku salaysan tahay *jiifto* halka hore laga ga daray *kor-u-kac*<sup>xxx</sup> [Kor-u-kac + Jiifto].

Faarax Gammuute waxa uu aad ugu fiirsaday doorashada ereyada. Maansada 'Hoodaar' waxa ay ka koobantahay 154 bayd. Guud ahaan waxa ku jira 510 erey oo ka soo farcamay 377 erey oo kala kaan ah. Marka laga tago xidhiidhiyeasha hadalka Soomaaliga ah oo dhan ugu noqnoqoshada badan (tus. *la*(19 jeer) *ka*(13 jeer) *waa*(13 jeer), *ku*(11 jeer) *u*(9 jeer)), ereyada uu Faarax Gammuute maansadan ugu adeegsiga badan yahay waa xidhiidhiyaha *iyo* (18 jeer), sidoo kale ereyada *leh* (8 jeer), *ayaan* (8 jeer) *iyo hir* (7 jeer). Eeg rakaadka ereyada 'hoodaar' shaxanka 2aad qaybtiiisa b.

Xaraf-raaca ha'layda waxa uu Faarax adeegsaday 208 erey, oo marka laga reebo magaca Hadraawi iyo falka *hir* oo isku bayd ah, aanu ku noqnoqon ereyga xarafraaca adeegsigiisa. Magaca Hadraawi waxa uu toos u magacdhebayaa 10 goor, waxana uu 7 ka mid ah ku sheegayaa 7 astaamood oo uu ugu hiranayo saaxiibkii: 1) toosnaan 2) abwaannimo 3) geesinnimo, 4) deeqsinnimo 5) garasho, 6) dulqaad iyo 7) farshaxannimo.

Habdhaca maansada ee dhaantada asaliga ah, waxa loo akhriyayaa sidan soo socota. Waxa aynu tusaale u soo qaadanaynaa laba tuduc oo midi yahay dhextaalka maansada:

*Garaad/hakiyoo/hubsiina le*  
*x --- / x x --- / x --- x x*  
*Talada/ hadhinaa/ya hoosada*  
*x x x / x x --- / x --- x x*  
*Ayaan / ugu hiran/ Hadraawiye*  
*x --- / x x x x / x --- x x*

Baydka labaad ee dhextaalka u ah maansada.

*Malluug/gana hilin/ba waa hilin*  
*x --- / x x x x / x --- x x*  
*Hoyaad/-kana maan/-so waa hoge*  
*x --- / x x --- / x --- x x*  
*Horaad/-ka la saan/-yay Heemaal*  
*x --- / x x --- / x --- ---*

## Rakaadka, meelaynta iyo adeegsiga ereyga ee maansada 'Hoodaar'

U dhugyeelashada rakaadka<sup>xxxii</sup> erey-adeegsiga Faarax Gammute ee maansadan 'Hoodaar' waxa aad ka dareemaysaa quruxda maansada iyo habdheceeda. Tusaale ahaan isoggolaanshaha<sup>xxxiii</sup> ereyga 'iyo' oo ka mid ah ereyada uu ugu adeegsi badan yahay maansadan, waxa aad ka arkaysaa sida abwaanku sida qurux badan isugu lammaaneeyey ereyada sammiga ah ama isku lidka ah, isaga oo haddana ku ekaanaya xaraf-raaca maansada. Maansayahanka Soomaaligu aad bay arrinkan u adeegsadaan. Shaxankan kowaad waxaad ku arkaysaa isoggolaanshaha ereyga 'iyo'<sup>xxxiv</sup>.

*Shaxanka 1aad: tusaalaha isoggolaanshaha xidhiidhiyaha 'iyo'.*

<b>xxxiv Isoggolaanshaha ereyga 'iyo' ee maansada 'Hoodaar'</b>				
Hormuud/Layli	Hormuud	iyo	Layli kala hadhe	Liddi
Gabno/Harawo	Gabno	iyo	Harawaduna kala haad	Liddi
Hiraab/Fiid	Hiraab	iyo	Fiidba heetayn	Liddi
Hadhiin/Loo-hadh	Hadhiin	iyo	Loo-hadh loo badi	Sammi
Hiir/Saq	Dareenkana haatuf hiirta	iyo	Saqdaba hiddidiila hooyalin	Liddi
Dhadhanka/meel shidan	Hahdaa gumarta	iyo	halkaa shidan	Sammi
Had/God	Hadda	iyo	godankiyo bal heedhaha	Sammi
Higlo/Galool	Higlo	iyo	kala firi galool hawd	Liddi
Himir/Hunguridhubuq	himir	iyo	Hunguridhubuq	Sammi
Habuur/Haldhacda	Habuur	iyo	Haldhacada(*)	Sammi
Hir/Bilg	Hirka	iyo	biligtana ka haybsaday	Sammi
Hanasho/Dhaqan	Mullaax hanash	iyo	hufnaan dhaqan	Sammi
	Milgada hidde loo hiloob	iyo		
Haldoor/gabyaa	Haldoor	iyo	gabay haloosiyan	Sammi
Dhif/Naadir	Dhif	iyo	hibo naadir lagu helo	Sammi
Garaad/hubsimo	Garaad hakiya	iyo	oo hubsiina le	Sammi
Halbeeg/Halhays	Halbeeg	iyo	noqon halhays ubad	Sammi
Hagaas/Hareeri	Hagaas	iyo	waa hareeriye	Liddi

(\*) **Habuur** lagu sado hilowgiyo | Dhirtuna himir iyo hunguridhubuq | Ayay **haldhacada** la haanyoon

*Shaxanka 2aad.*

Shaxanka qaybihiisa kala duwan waxa Rakaadka erey-adeegsiga "Hoodaar" aynu ku eegnaa Kaydka Af Soomaaliga<sup>xxxv</sup>. Waxa kale oo tusaale u soo qaadanaynaa isoggolaanshaha qaar ka mid ah ereyada uu abwaanku ugu adeegsiga badan yahay maansadan.

A. Isoggolaanshaha ereyada *na, soo, leh*

**Kaydka Af Soomaaliga (Somali Corpus) 2016–2020**

**Is oggolaanshaha ereyga *na* ee dhiganaha Hoodaar**

1	Gabno iyo harawadu	na	kala haab
2	Ladhkii ku higaagan haanku	na	
3	Kashii sida haan habaysa	na	
4	Xidaar haftabaxay	na	hoomaa
5	Markuu hinjiya	na	hal soo gudhay
6	Runtii habacsani	na	waa hebed
7	Tashiga hinnigsani	na	waa hoog
8	Horseed cayima	na	u riday horay
9	Hirka iyo biligta	na	ka haybsaday
10	Ha ♦layda	na	lagu hallaynayn
11	La hadhin addinka	na	halbeegsiga
12	Ka hirin nabadda	na	hummaajada
13	Markii la hurdoodo heelka	na	

**Is oggolaanshaha ereyga *soo* ee dhiganaha Hoodaar**

1	Jir baa hanqadh	soo	harraatiya
2	Markay harawaati	soo	hori
3	Warku na qacda horaba	soo	haad
4	Markuu hinjiya na hal	soo	gudhay
5	Hambaaska na	soo	horaay yidhi
6	Hadday kolba hurin hab	soo	odhan

**Is oggolaanshaha ereyga *leh* ee dhiganaha Hoodaar**

1	Hoheey damqashada hafeefta	le	
2	Halraaca na dhalan halqooq u	le	
3	Ilhaam hodannimo hannayn u	le	
4	Garaad hakiyoo hubsiina	le	
5	Dadnimo hadimada halgaad u	le	
6	Ishii habranaysa hiil u	le	
7	Habeen-dhalad weeye hooda	le	
8	Hadraawi ga habaqle hoo u	le	

B. Rakaadka erey adeegsiga ee maansada 'Hoodaar'

Rakaadka adeegsiga ereyada ee Hoodaar			
#	Erey	Inta jeer	Eeg
1	la	21	<input type="checkbox"/>
2	ka	16	<input type="checkbox"/>
3	waa	14	<input type="checkbox"/>
4	na	13	<input checked="" type="checkbox"/>
5	ku	11	<input type="checkbox"/>
6	Hadraawi	10	<input type="checkbox"/>
7	leh	8	<input checked="" type="checkbox"/>
8	u	8	<input type="checkbox"/>
9	ayaan	8	<input type="checkbox"/>
10	hilin	8	<input type="checkbox"/>
11	ye	7	<input type="checkbox"/>
12	iyo	7	<input checked="" type="checkbox"/>
13	hiro	7	<input type="checkbox"/>
14	soo	6	<input checked="" type="checkbox"/>
15	dheh	6	<input type="checkbox"/>
16	mar	6	<input type="checkbox"/>
17	gu	5	<input type="checkbox"/>
18	ayaa	5	<input type="checkbox"/>
19	ba	5	<input type="checkbox"/>
20	hor	4	<input type="checkbox"/>
21	aan	4	<input type="checkbox"/>
22	loo	4	<input type="checkbox"/>
23	hoyaad	4	<input type="checkbox"/>
24	maanso	4	<input type="checkbox"/>
25	in	4	<input type="checkbox"/>

**Hoodaar, Faarax Axmed Cali "Gammuute", Hargeysa, 2018**

Hormuud <sup>1</sup> iyo layli <sup>2</sup> kala hadhe Gabniyo <sup>3</sup> harawaduna <sup>4</sup> kala haab <sup>5</sup> Bilkeed <sup>6</sup> hal'abuurba heeraar <sup>7</sup>	01
Cukaartana <sup>8</sup> heec <sup>9</sup> hawaawiran <sup>10</sup> Hiraab <sup>11</sup> iyo fiidba heetayn <sup>12</sup> La yidhi hanfadaa <sup>13</sup> ku haarayn <sup>14</sup>	04
Waxay habili'i <sup>15</sup> horbooddaa Halleeyana <sup>16</sup> gacan u haadshaa Cindiga <sup>17</sup> handashada <sup>18</sup> hoggaansama	07
Lugtii hadaftee <sup>19</sup> shil hayhaad <sup>20</sup> Hibaaq <sup>21</sup> uga lulo huruudiya Habaaska mar bay hawaarsane <sup>22</sup>	10

<sup>1</sup> Hormuud = Awrka hayinka ah ee had iyo jeer loogu horreysiyo hoggaanka awrta xidhiidhsan. Ka soo horjeeda

<sup>2</sup> Layli = Qaalinka ama faraska yar ee la jarabarayo. Halkan waxa ereygu ugu jiraa qaalinka; ka soo horjeedka awrka hayinka ah.

<sup>3</sup> Gabno = Hasha caana yaraya. Ka soo horjeedda harawada.

<sup>4</sup> Harawo = Hasha caanaha badan. Ka soo horjeedda gabnada.

<sup>5</sup> Kala haab = Isku noocba ma aha. Way kala durugsan yihii.

<sup>6</sup> Bilkeed = Xulasho, doorasho. Halkan macnuhu waa halabuurku doorashada godka maansada uu ka degay isaga aaya leh.

<sup>7</sup> Heeraar = Sabo; meel la deggan yahay; aag.

<sup>8</sup> Cukaar = Cadka yar e ka sarreeya duleelka dhegta. Wuxuu la yidhaahdaa waa halka ugu horreysa ee maqalku soo gaadho.

<sup>9</sup> Heec = Hadalka aan nuxurka lahayn; [cudurna way noqotaa] Halkan waxay ugu jirtaa hadalka xumi dhagta waa soo gaadhaa.

<sup>10</sup> Hawaawiran = Aan abbaar lahayn; marinkiisii aan haysan. Halkan waa hadalka aan meelna haysan oo soo gaadhay dhegta.

<sup>11</sup> Hiraab = Aroorta hore. Subaxa.

<sup>12</sup> Heeteyn = Xoolaha ayaa la heeteyyaa, eryaa (tus. "Ayagoon wax hubinoo ogeyn, waxa i heeteeyey", Cilmi Boodheri: *Heeska Caashaqa*, eeg Cabdirashiid Maxamed Ismaaciil iyo Idris Yuusuf Cilmi, bogga 49 = ii oggolaan waayay in aan nasto).

<sup>13</sup> Hanfade = Ninka dadka badan ee aan cuntada sugin. Halkan waxay ugu jirtaa salfudayd.

<sup>14</sup> Haarayn = Sumadayn ka timi gubniin (tus: "haar baa igu taal halbowlaha", Hadraawi: *Heego Muuq Dheer*).

<sup>15</sup> Habili'i = [Habi la'aan] qof aan wixii hore soo xusuusan, si qoto dheer uga fekerin. Warla'aantana way noqotaa.

<sup>16</sup> Halleeye = [Magac lab] Kii wax luminaayay, wax halleeyey.

<sup>17</sup> Cindiga = Maanka, kasha.

<sup>18</sup> Handashada = Muhashada, sasabashada ayay halkan ugu jirtaa.

<sup>19</sup> Hadafta = Afka gammaanka: Geenyadaa hadafta, iska dhaqaaqda.

<sup>20</sup> Hayhaad = Meel fog. Lugtii iska dhaqaaqda qorsha la'aan ee meel dheer aadda, iyadoo loo haadiyey waxaan run ahayn.

<sup>21</sup> Hibaaq = Ubax.

<sup>22</sup> Hawaarsan: Salka si xun ugu fadhiisato: tuducu waxa uu leeyahay qofkii qorsha li'i ku dhaqaqa, ee meel fog laga tuso wax aan run ahayni, loona qurxiyo, meel xun buu ku dhacaa ugu danbaynta. Dabaduu dhulka ku

Fartaan ka habaabin meel huri <sup>23</sup>	13
Ladhkii <sup>24</sup> ku higaagan <sup>25</sup> haankuna <sup>26</sup>	
Ayuu hibashada <sup>27</sup> ku haabtaa <sup>28</sup>	
Dhudaaan <sup>29</sup> ka hengelanin <sup>30</sup> heemadu <sup>31</sup>	16
Sadhy <sup>32</sup> hillo <sup>33</sup> kala hulleeshaa <sup>34</sup>	
Hungana <sup>35</sup> lagu tiri haldhurashada <sup>36</sup>	
Kashii sida haan habaysana <sup>37</sup>	19
Hadhiiniyo <sup>38</sup> loo-hadh <sup>39</sup> loo badi	
Hundana <sup>40</sup> ku aroor horqaadkuye <sup>41</sup>	
Baddaa la humhuman <sup>42</sup> hir laalacin <sup>43</sup>	22
Jir <sup>44</sup> baa hanqadh <sup>45</sup> soo harraatiya	
Daryaale <sup>46</sup> ma hurayo hoosdadab <sup>47</sup>	
Dareenkana haatuf <sup>48</sup> hiirtiyo <sup>49</sup>	25

dhuftaa.

<sup>23</sup> Huri: Meeshii huraya, gubanaysa, damqanaysa, boogta ah. Halkaas iyo gacantu isma waayaan.

<sup>24</sup> Ladh: Xanuunka [ladh baa soo kaca].

<sup>25</sup> Ku higaagan: Ku qaflan ku daboolan, ku qarsoonna way noqotaa.

<sup>26</sup> Haanka: Rubadda, galowda. (tus. “Haankiyo wadnaha biyaha habaya”, Hadraawi: *Heego muuq dheer*), qalbigana way noqotaa.

<sup>27</sup> Hibashada: Gocashada.

<sup>28</sup> Haabasho: Gacanta la aaddo, soo qabo is leedahay (tus: “Hareertayda oo madhan is idhi, haabo gacanteeda”, Cilmi Boodheri: *Sidii geel harraadoo waxbadan hawdka miranaayay*: Eeg Maxamed Xirsi Guuleed, 2014).

<sup>29</sup> Dhudda: Xubinta.

<sup>30</sup> Hengelan: Asayda la qaato murugo awgeed; halkan waxay uga jirtaa ‘ka gilgilanin’. (tus: “Hengel baan ka sitaa haween dumar”, Hadraawi: *Heego Muuq Dheer*).

<sup>31</sup> Heemada: Huubada, waxa soo hadha, hambadana way noqotaa.

<sup>32</sup> Sadho: wasakhda; nuqsaantana way noqotaa. Halkan waxay ugu jirtaa “magac xumaa ka raacday”, wadhi baa ka raacday.

<sup>33</sup> Hillo: Ceelka lagu kulmo ee biyaha laga soo doonto. Gole ayay halkan ugu jirtaa.

<sup>34</sup> Kala huleeshaa: Kala tagtaa goobta iyada oo foolxumaani ku dheehan tahay.

<sup>35</sup> Hungo: Wax madhan, eber.

<sup>36</sup> Haldhurasho: Xulashada, saamiqaybsigaa wixii ku gu soo hagaagtagay.

<sup>37</sup> Habaysa: Biyaha sii daynaysa.

<sup>38</sup> Hadhiinyo: La liiday, waxba ann la iskaga tirin.

<sup>39</sup> Loo-hadh: Wixii la iska yeesho ee aan wax la iskaga tirin helitaankeeda.

<sup>40</sup> Hundaha: Gondaha.

<sup>41</sup> Horqaadka: Horyaalka.

<sup>42</sup> Humhuman: Isu diyaarinayaa, xaamxaamaasho.

<sup>43</sup> Laalacin: Meel sare saaris.

<sup>44</sup> Jir: Roob wayn oo aan hore u qaadin.

<sup>45</sup> Hanqadh: Onkod.

<sup>46</sup> Daryaale: Aqal aad u wayn, aqal soomaali, laba-daryaale kolka arooska loo dhisayo.

<sup>47</sup> Hoosdadab: Cawskii hoos dadabka loo adeegsanayay.

<sup>48</sup> Haatuf: Shimbirkii la odhan jirey waa la soo direy.

<sup>49</sup> Hiirta: Arooryada hore.

Saqdaba <sup>50</sup> hiddidiila <sup>51</sup> hooyalin <sup>52</sup> Ayay himis <sup>53</sup> wada hadaafeen <sup>54</sup>	28
Malluuggana <sup>55</sup> hilinba waa hilin <sup>56</sup> Hoyaadkana <sup>57</sup> maanso waa hoge <sup>58</sup> Horaadka <sup>59</sup> la saanyay <sup>60</sup> Heemaal <sup>61</sup>	
**	
Markay harawaati <sup>62</sup> soo hori <sup>63</sup> Hawada ku tibaaxday heegadu <sup>64</sup> Hagoogtuna <sup>65</sup> waa ka hawraar <sup>66</sup>	31
Dundumo halabtii <sup>67</sup> u taal halaq <sup>68</sup> Hanqaarana <sup>69</sup> dulin <sup>70</sup> ku huursaday <sup>71</sup> Sagaar <sup>72</sup> war hayaan huluulane <sup>73</sup>	34
Handoodsiga <sup>74</sup> eegay haayire <sup>75</sup> Hadaaqsiga <sup>76</sup> gurux <sup>77</sup> luddaan <sup>78</sup> hadin <sup>79</sup>	37

<sup>50</sup> Saqda: habeenkii badhtamihiisa, saqda dhexe.<sup>51</sup> Hididdilo: Yididdilo, ididiilo<sup>52</sup> Hooyalin: rajo ku naaloonaya.<sup>53</sup> Himis: Magac dheddig: Himis (ta), hiimsehiimseha.<sup>54</sup> Wada hadaafeen: Is raaceen.<sup>55</sup> Maluug: Xiddig.<sup>56</sup> Hilin: Waddo (meerihi waliba waddo gaaro ah iyo soohdin uu meero).<sup>57</sup> Hiyaad: Go'aanka. Halkay wax ku soo aroorayeen.<sup>58</sup> Hog: Waa godkii ay wax ku soo aroorayeen.<sup>59</sup> Horaad: Kii horreeyey.<sup>60</sup> Saanyey: Xulashada, doorashada.<sup>61</sup> Heemaal: Hal magaceed. Hashii Heemaal.<sup>62</sup> Harawaati: Roobka aad u xoogga wayn, gabayga xaddiga lehna waa la yidhaahdaa.<sup>63</sup> Soo hori: Soo curan doonto (cirku markuu curan doono ayaya halkan ugu jirtaa).<sup>64</sup> Heegada: Daruurtii, samadana way noqotaa.<sup>65</sup> Hagoog: Huga la soo hagoogto: la eeg ereyga "hawraar". Halkan macnuhu waa hagoogtu wax bay sheegaysaa.<sup>66</sup> Hawraar: hadal murti ah [halkan waxya ugu jirtaa hadalmiisaan leh] [baydkani waa 'sheedda iga ga garo'].

Dagaalka geelii hagoogane ee geela lagu qaaday, waxa magaca loogu bixiyey "hagoogane", waa ninba si buu u hagootay. Kii qaaday geelu kibir buu la hagoogtay, iyo is qaadqaad iyo faan. Kii laga qaadayna murugo iyo ciil ayuu la hagoogtay. Halkaasuu ka yimi magaca hagoogane.

<sup>67</sup> Halabtii: Alaabadii, xoolihii, hantidiisi.<sup>68</sup> Halaq: Mas halis ah.<sup>69</sup> Hanqaaro: Hadimooyin, dhibaatoooyin.<sup>70</sup> Dulin: Cayayaan wax cuna oo qaniinyo kulul.<sup>71</sup> Ku Huursaday: Ku qarsaday, dhigtey.<sup>72</sup> Sagaar: ato (sakaarada labkeedka)

<sup>73</sup> Aan huluulan e: Waligii ma galayo atoorku meeshaa halista ah. Huluulasho = gelis meel cidhiidhi ah. Waxa la yidhi "waxaruhu ma dhaadaan godka dundumada ku hoos yaalla ee uu halaqu ku jiro. Sakaarkuna, ama atoorkuna wuu feejigan yahoo waligii kuma hodmo, lugta ma galiyo, waanuu ka feejigan yahay waxarka".

<sup>74</sup> Handoodsi: Hoos u foorarka.<sup>75</sup> Haayire = Tuugga.

Ka hooye ilaal <sup>80</sup> intay hogan <sup>81</sup>	
Harowsiga <sup>82</sup> loo humbaallee <sup>83</sup>	40
La hiishade <sup>84</sup> hiimsehiimsaha <sup>85</sup>	
Hadoof <sup>86</sup> gorof loogu haylhayl <sup>87</sup>	
Waxseen kaga hadhay hormayn <sup>88</sup> eray	43
Hahdaa <sup>89</sup> gumartiyo <sup>90</sup> halkaa shidan	
Hoheey damqashada hafeefta le	
Inaan la hurayn hawaaraha <sup>91</sup>	
Ayaan ka hayaa hawaalaha <sup>92</sup>	
Haddiyo <sup>93</sup> godankiyo <sup>94</sup> bal heedhaha	48
Hulkuu <sup>95</sup> gondadhigay <sup>96</sup> hallaaluuhu <sup>97</sup>	
Hayaankuna geeyay heeryada	
Hawaarta dhafoor ku heeladan <sup>98</sup>	51
Hadee <sup>99</sup> weji yidhi hadeyn <sup>100</sup> waa	
Warkuna qacda horaba soo haad	
Xidaar <sup>101</sup> haftabaxayna <sup>102</sup> hoomaa <sup>103</sup>	54

<sup>76</sup> Hadaaqsi: Hadaaqii carruurtii, gabaygana way noqota. Wada hadalkana way noqotaa, sidaasayna halkan ugu jirtaa.

<sup>77</sup> Gurux: Ilka hadalka. Gurux waa isha

<sup>78</sup> Luddaan: Niyaddiisa, maankana way noqotaa. [tus. “Ragannimo *luddii* kuma jirtee, liicyey halla ogaado” Abwaan aanan garanayn]

<sup>79</sup> Hadin: Garashada.

<sup>80</sup> Ilaal: Ishaaqsiga [Ilaal ka hoyn]; harowsiga.

<sup>81</sup> Hogan: Intay hoos u jeeddo.

<sup>82</sup> Harawsi: didsasho, eryad, baallooxootho. Hay harowsan, ha didsan.

<sup>83</sup> Hubaallayn: Belaayaa la isaga dhigayaa.

<sup>84</sup> La hiishade: la kaadhsade, rakaabsi.

<sup>85</sup> Hiimsehiimse: xilligii aan araggii fiicnayn, cadceeddu sii dhacday.

<sup>86</sup> Hadoof: Wax madhan.

<sup>87</sup> Loogu haylhayl: Loogu shubay, si aan waafi ahayn; loogu saydsaydhay.

<sup>88</sup> Hormayn: Hormogalin, waxay ugu jirtaa, maansayn.

<sup>89</sup> Hahda: Kulaylka ay Gumartu leedadahay. Hahda geedka Gumarta.

<sup>90</sup> Gumar: Geedkii lagu cadayanayay.

<sup>91</sup> Hawaarahaa: Boogaha.

<sup>92</sup> Hawaalaha: Waqtiga, xilliyyada.

<sup>93</sup> Hadda: Imminka.

<sup>94</sup> Godanka: Gobo’dii, halkay ku ururtay.

<sup>95</sup> Hulkuu: Meesha godan.

<sup>96</sup> Gondadhigay: Salka dhigay.

<sup>97</sup> Hallaaluha: Waa ciyaar la isku halxidhaaleeyo.

<sup>98</sup> Ku heeladan: Ku xaraysan: (tus. “war dhafoor buu ku yaallaa”, Maahmaah).

<sup>99</sup> Hadee: Qari, dabool.

<sup>100</sup> Hadayn waa: Kari waa.

<sup>101</sup> Xidaar: Xiddigiye.

Hanfiga <sup>104</sup> maqashii <sup>105</sup> la yidhi hoos <sup>106</sup> Hantool <sup>107</sup> uga badan hadhsiimada <sup>108 109</sup>	
Dohdana <sup>110</sup> hanjaleela <sup>111</sup> sii horan <sup>112</sup> Ku humi <sup>113</sup> inta fool <sup>114</sup> hirgoolayn <sup>115</sup> Hiraalkana <sup>116</sup> fayd <sup>117</sup> hallaalida <sup>118</sup>	57
Wakhiga hadwadaanse <sup>119</sup> hagarbixin Markuu hinjiyana <sup>120</sup> hal soo gudhay Ayuu la habqami <sup>121</sup> habeenada <sup>122</sup>	60
Runtii habacsanina <sup>123</sup> waa hebed <sup>124</sup> Tashiga hinniganina <sup>125</sup> waa hoog Cidluu hirrig <sup>126</sup> kugu la hiirdayn <sup>127</sup>	63
Nabdiga <sup>128</sup> lagu hadhay ma heermine <sup>129</sup>	66

<sup>102</sup> Hafatabaxay: In badan ordi kara ayaa la yidhaa wuu haftabaxay.<sup>103</sup> Hoomaa: Daymada (daymoo).<sup>104</sup> Hanfiga: Kulayka marka cadceedu ugu kulushay.<sup>105</sup> Maqal: Xoolihii yaryaraa.<sup>106</sup> Hoos: Hadh.<sup>107</sup> Hantool: Naxash.<sup>108</sup> Hadhsiimada: Duhurkii.<sup>109</sup> [Tuducan sheeko dhab ah buu ka warramaya. Abwaanka iyo saaxiibbadii oo xilligii dagaalka xoraynta ku jira ayaa xabaalisa soo dultaagay si ay wax uga aasaan. Meesha naxdinteeda, abaarta, colaadda iyo geed la'aanta ayuu abwaanku jalleecay waxaro yaryar oo markay meel ay cadceeedda ka hadhgalaan waayeen, naxashkii maydka lagu sidey hoos hadhsanaya. Ma aan ilaawin buu yidhi sawirkaas, 40 sannadood ku dhawaad ka dibna maansadii ku soo daray: in marka abaar iyo colaad iyo geed li'i timaaddo xitaa naxashkii huriwaa u noqdey waxarihiij]<sup>110</sup> Dohda: Ceelka, meesha la isugu miyaaddo: (tus. "Dohdu waamo maahee, dirir baa ka socotee" Hadraawi: *Daallaley*).<sup>111</sup> Hanjaleelada: Baaladaymoodka, daymada: (tus. Marka cunugga haartiyo, hanjaleelku ka goo, kana kaco habaaskaa, hooyadu mashxaraddaa: Hees, *mooyi cid tirisey*).<sup>112</sup> Sii horan: Sii durugsan.<sup>113</sup> Ku humi: Ku day (tus: "Humminoo taladii hunsami wayday" Hadraawi: *Heego Muuq Dheer*)<sup>114</sup> Fool: Waji.<sup>115</sup> Hirgoolayn: Isku dir ('hirgoo' ayaa la yidhaahdaa awrta kolka la isku dirayo).<sup>116</sup> Hiraalka: Inta muuqata.<sup>117</sup> Ka fayd: Ka qaad, ka leexi, ka baydhi.<sup>118</sup> Hallaalida: Daah ayay halkan ayay ugu jirtaa.<sup>119</sup> Hadwadaan: Lunsan, seeggan marinkiisa.<sup>120</sup> Hinjin: Kor u qaadis.<sup>121</sup> Habqan: Hadalka socodka la soo socda ee kala daadsanaan. Wax aka soo horjeeda jaanta la isla qatay<sup>122</sup> Habeeno: Aragxumoda: halkan waxay ugu jirtaa guul darro.<sup>123</sup> Habacsani: Kala daadsane.<sup>124</sup> Hebed: Hasha nacasnimada – doqon ayay halkan ugu jirtaa.<sup>125</sup> Hinnigan: Jimidhka yar (halkan waa yaraan, caato).<sup>126</sup> Hirrig: Meel qodax leh.<sup>127</sup> Hiirdayn: Ku daali, kuu neefqabatoobi, dirgan waa.<sup>128</sup> Nabdigia: Qalbiga wali nool.<sup>129</sup> Ma heermin: muu noqon go'in.

Wax lama hadhe<sup>130</sup> aanse lagu hadhin  
Lagana hadhay baa kadmoo<sup>131</sup> hadhay

<sup>132</sup>Malluuggana hilinba waa hilin  
Hoyaadkana maanso waa hoge  
Horaadka la saanyay Heemaal

69

\*\*\*

Higliyo<sup>133</sup> kala firi<sup>134</sup> galool hawd  
Galshana<sup>135</sup> habbanida<sup>136</sup> ku hoyay Dirir<sup>137</sup>  
Guguna hibitiqa<sup>138</sup> ku hoobali

72

Dhulkuna hun<sup>139</sup> gablamay<sup>140</sup> haskii<sup>141</sup> tuur  
Hasari<sup>142</sup> shinkudhalad<sup>143</sup> la hooshaar<sup>144</sup>  
Hambaaskana<sup>145</sup> soo horaay yidhi

75

Habuur<sup>146</sup> lagu sado<sup>147</sup> hilowgiyo<sup>148</sup>  
Dhirtuna himir<sup>149</sup> iyo hunguridhubuq<sup>150</sup>  
Ayay haldhacada<sup>151</sup> la haanyoon<sup>152</sup>

78

Haldhaaguna galow<sup>153</sup> la hayb noqoy  
Huguna<sup>154</sup> ka badh gole hubqaadkii  
Adduunyada haadba haad kici

81

<sup>130</sup> Wax la ma hadhe = ma xishoode.

<sup>131</sup> Kadmay: habaarmay, wuu jabay.

<sup>132</sup> Tuducan waa dhextaal oo hore ayaa loo macneeyey ereyadiisa. Eeg meerisyada 28-30.

<sup>133</sup> Higlo: Geed madow.

<sup>134</sup> Firi: Midhaha, iniinyahaa la beerayo. Halkan waxay ugu jirtaa abuur ('kala firi' = labada geed waa 'kala abuur').

<sup>135</sup> Galsho: Goobada uu dayaxu galo; biyahana waa la yidhaahdaa; dayaxaa daga (tus. galshuu dagay).

<sup>136</sup> Habbanida: Habsoomi.

<sup>137</sup> Dirir: Xiddig.

<sup>138</sup> Hibitiqa: Dhibieda roobka da'aya.

<sup>139</sup> Hun: Dharka duugga ah.

<sup>140</sup> Gablamay: Dhintay , duug ah; gaboobay.

<sup>141</sup> Haska: Dhaska fuula shay aan baryahaa la adeegsan. Qolofta na waa la yidhaahdaa. Halkan qolof ayay ugu jirtaa.

<sup>142</sup> Hasari: Macawis, ama go' [Haasaa hasari]

<sup>143</sup> Shinkudhalad: Xilligii loogu talagalay ku dhashay. Waxa sadkii go'ay.

<sup>144</sup> La hooshaar: Ku xaragoo, la xarragoo.

<sup>145</sup> Hambaaska: Ugbaadka, hoobaanta.

<sup>146</sup> Habuur: Udgooonka, meel magaceedna waa la yidhaa; udgoonka way noqotaa.

<sup>147</sup> Lagu sado: la siiyo, lagu dhuunyo.

<sup>148</sup> Hilowga: Boholoyowga.

<sup>149</sup> Himir: Midho.

<sup>150</sup> Hunguridhubuq: Midhaha qadhaabka.

<sup>151</sup> Haldhacada: Midhaha bislaaday.

<sup>152</sup> La haanyoon: La soo orod, keenis.

<sup>153</sup> Galow: Shinbir (u fiirso. "Gorayo haad noqoteey").

<sup>154</sup> Huga: Dharka (u fiirso. "Dharkaagu wuu kula shir tagaa")

Markaan ka hawadi <sup>155</sup> hirwada <sup>156</sup> idhi Intaan la hinqaday <sup>157</sup> hankaabsiga <sup>158</sup> Horseed cayimana u riday horay <sup>159</sup> Hummaagga la doontay heensaha	84
Haddaan hindisaha ku halabsaday Nugaaliga <sup>160</sup> haansahaansaha <sup>161</sup> Hirkiyo biligtana ka haybsaday	88
Xil baa hollashada <sup>162</sup> i yidhi hudi <sup>163</sup> Xushmana hambalyada hibee yidhi Tixdana hadafkeedu waa hidin <sup>164</sup>	91
Waxaa sida hebebed <sup>165</sup> heehabin <sup>166</sup> Ha'laydana lagu hallaynayn Hakuye labadaba hudeec <sup>167</sup> maran <sup>168</sup>	94
Hiyiga guran <sup>169</sup> bay ka hoosiye Cir haawanayoo <sup>170</sup> hunguuftiya <sup>171</sup> Dabayla hugmaa <sup>172</sup> ka heesaan Ayay hogol uga hillaaaciye Hadhkoo galay buu hillaabane Sarriigay <sup>173</sup> hankii hilaad fogi	97

<sup>155</sup> Ka hawadi: Ka bilaabo, maansynta (tus. “aan hawadiyo caawoo kaloo haybad leeyahay e”, Abwaan aanan garanayn]

<sup>156</sup> Hirwo: Nooc ka mid ah dhaantada.

<sup>157</sup> Hinqad: Laab la kaca.

<sup>158</sup> Hankaabsi: Kor u fadhiisi [Libaaxaa lagu isticmaalaa – hanjabaad baa ku jирто]. (tus. “Marna waa hummaaggi, Qofka kula hadlaayoo, Intuu soo hankaabsaday, Iska rogay hillaabtoo, Kugu yidhi hankaygiyo, Habka maansadaydiyo, Hiyigayu waa kaa”, Hadraawi: *Halabuur*).

<sup>159</sup> Horseed sahan ah baa loo diraa. Sahan buu dirasanayaa iyagoo iska deggan. Reerkii wuu garanayaa halka la degaya laakiin wuu ka sii hormaraa.

<sup>160</sup> Nugaali: Faras ka nugaaleed (fardaha kii qiiimaha lahaa).

<sup>161</sup> Haansehaanse: Socodka orodka ka mid ah oo qurux badan, xarrago ku jирто.

<sup>162</sup> Hollashada: Isku day.

<sup>163</sup> Hudi: Adhiga marka la dhaqaajinayo; maansadana bilow; dhaqaajinta; magacna waa loo bixinaya geenyada dheeraysa.

<sup>164</sup> Hidin: Bixin.

<sup>165</sup> Hebebed: Hebed (hebel waa hebebed, ninkaasi waa nacas).

<sup>166</sup> Heehabin: Daayacad.

<sup>167</sup> Hudeec: Nacas ay dhaga adkaani ku jирто (U firso: “waa hudeec oo labada wuu maran yahay”).

<sup>168</sup> Maran: (naaskaa la maraa). (Tus. “Sammane iska yeelyeel baa, geela saddex loo maraa”, Sheeko aan ka soo gaadhay oyey dhaqameedyo kaftamaya).

<sup>169</sup> Guran: (gudhan) Ma buuxo (wuu dhiman).

<sup>170</sup> Haawanaya: Madhan.

<sup>171</sup> Hunguufti: Faaruq ah.

<sup>172</sup> Hugma: Dabaylo soo guuxaya.

<sup>173</sup> Sariig: Xumo ka dhowrsi, xishooday.

<sup>174</sup>Malluuggana hilinba waa hilin  
Hoyaadkana maanso waa hoge  
Horaadka la saanyay Heemaal

103

\*\*\*\*

Milgada<sup>175</sup> hidde loo hiloobiyo<sup>176</sup>  
Mullaax<sup>177</sup> hanashiyo<sup>178</sup> hufnaan<sup>179</sup> dhaqan  
Ayaan ugu hiran Hadraawiye

106

Haldoor iyo gabay haloosiyan<sup>180</sup>  
Dhif iyo hibo naadir lagu helo  
Ayaan ugu hiran Hadraawiye

109

Higgaad lagu ladhay habmaamuus  
Horyaalnimo loogu hawlgalay  
Ayaan ugu hiran Hadraawiye

112

Farshaxan hogo roob la haabada<sup>181</sup>  
Halraacana dhalan halqooq<sup>182</sup> u le  
Ayaan ugu hiran Hadraawiye

115

Ilhaam<sup>183</sup> hodannimo hannayn<sup>184</sup> u le  
La hadhin addinkana halbeegsiga  
Ayaan ugu hiran Hadraawiye

118

Garaad hakiyoo hubsiina le  
Talada hadhinaaya hoosada  
Ayaan ugu hiran Hadraawiye

121

Dadnimo hadimada halgaad<sup>185</sup> u le  
Ishii habranaysa hiil u le  
Ayaan ugu hiran Hadraawiye

124

<sup>174</sup> Tuducan waa dhextaal oo hore ayaa loo macneeyey ereyadiisa. Eeg meerisyada 28-30.

<sup>175</sup> Milgada: Sharafta.

<sup>176</sup> Loo hiloobay: Loo boholyoobay; loo baahday.

<sup>177</sup> Mullaax: Dunbuu leeyahay.

<sup>178</sup> Hanasho: Hantiyo.

<sup>179</sup> Hufnaan: Ceebla'aan.

<sup>180</sup> Haloosi: Ku luuqaynta.

<sup>181</sup> La haabada = la mid ah.

<sup>182</sup> Halqooq: Mudnaa. Timaha halqooqa lihi waa tinta ugu fiican.

<sup>183</sup> Ilhaam: Hibo, maansada.

<sup>184</sup> Hannayn: Bixin.

<sup>185</sup> Halgaad: Tuuryada usha (magac dhaddig: halgaad-da).

Habeen-dhalad weeye hooda le Hadhuubka u sida haleelada <sup>186</sup> Hannaan gobannimo dun kula hiray	127
Martidu hadhacyada <sup>187</sup> hareeraha Hadday kolba hurin hab soo odhan Waxaa ula heellan hoobaan <sup>188</sup> Hadraawiga habaqle hoo u le	130
Adoon ku hagoogan halasaha <sup>189</sup> Markay halis tahay galayn holac <sup>190</sup> Sidiisana hurin <sup>191</sup> halbowlaha Gartay hawiraane hoy odhan Horaan isu baranay haydaar <sup>192</sup> Ka hirin <sup>193</sup> nabaddana hummaajada <sup>194</sup> Halligan <sup>195</sup> ula dhuuman hootada	134
Markii la hurdoodo heelkana <sup>196</sup> Tabniga <sup>197</sup> habas <sup>198</sup> gaadhka haynayn Miyaad magac hadha helaysaa Halbeeg iyo noqon halhays ubad Hadraawi sidiisa lagu habo?	141
Miyay hal'abuur haldheerida <sup>199</sup> Hagaas <sup>200</sup> iyo waa hareeriye <sup>201</sup> Markay halxidhaale hoosiis Halqaadyada <sup>202</sup> lagu hadoodilay <sup>203</sup> Hablaha u golaadin <sup>204</sup> hooyadu	147

<sup>186</sup> Haleelada: Hasha caanaha badan [suugaanta ayay halkan ugu jirtaa].

<sup>187</sup> Hadhacyada: Damallada.

<sup>188</sup> Hoobaan: Magac dheddig: Hoobaan (ta) = midhaha.

<sup>189</sup> Halasaha: Dhibaatada.

<sup>190</sup> Holac: Dab, olol.

<sup>191</sup> Hurin: Shidin.

<sup>192</sup> Haydaar: Magac dheddig: Haydaar(ta) = Dhibaatada

<sup>193</sup> Ka hirin: Ka eryin.

<sup>194</sup> Humaajada: Nabarka, gacanqaadka, gacan ka hadalka.

<sup>195</sup> Hallingan: Axmaq (qof, lab ah oo naxariis daran).

<sup>196</sup> Halleeka: Degaanka.

<sup>197</sup> Tabniga: Sidi.

<sup>198</sup> Habas: Shimbir.

<sup>199</sup> Haldheerida: Tartarnsiin.

<sup>200</sup> Hagaas: Gaaban. Ka soo horkeedka hareeri.

<sup>201</sup> Hareeri: Geed dheer. Ka soo horjeedka hagaas.

<sup>202</sup> Halqaadyo: Khiddado. Shaxdaa leh halqaad.

<sup>203</sup> Lagu hadoodiley: Lagu qariyey, lagu shareerey.

Sidii Halkaraan<sup>205</sup> ku hadalhayn

Malluuggana hilinba waa hilin  
Hoyaadkana maanso waa hoge  
Hadraawi u daaya Hoodaar<sup>206</sup>

153

---

<sup>204</sup> Golaadin: Golakeenka.

<sup>205</sup> Halkaraan: Diiwaanka xidhmada koobaadee maansada Hadraawi ku uruursan tahay.

<sup>206</sup> Hoodaar: Habeendhalad; Dheeraad qof lagu ladhay, oo hibo gaara ah la siiyay.

## Tixraac

Cabdirashiid Maxamed Ismaaciil, Idiris Yuusuf Cilmi, 2016  
*Cilmi Boodheri iyo Jacaylkii Taamka ahaa*, Hargeysa, Ponte Invisibile.

Farah Ahmed Ali "Gammuute", 2018  
*Coming of age: introduction to the Somali metrics*, Hargeysa, Ponte Invisibile.

Jama Musse Jama, [soo socda]  
*Ururin maansooyinka Faarax Axmed Cali "Gammuute"*, oo aan wali la daabicin. Xarunta Dhaqanka ee Hargeysa.

Jama Musse Jama, 2016  
*A Syntactically Annotated Corpus Of Somali Literature*, PhD Thesis, Oriental University of Naples, Naples, Italy.

Maxamed Baashe X Xasan, 2004  
*Halkahaleel*, London, Bashe Publications.

Maxamed Ibraahim Warsama, 1993  
*Hal-karaan: maansadii: Maxamed Ibraahim Warsama (Hadraawi)*, 1970-1990, Norske Somaliakomiteen.

Maxamed Xaashi Dhamac "Gaariye", 1976  
*Toddobaadkan iyo Suugaanta: Miisaanka Maansada*, Xiddigta Oktoober (Muqdishu: Soomaliya), 17 Jeenuary 1976: 3

Maxamed Xirsi Guuleed (Abdibashir), 2014  
*Cilmi-boodheri Caashaqiisi*, Eurosom bokförlag, Scansom.

## Iftiimin

---

<sup>i</sup> Jaamac Muuse Jaamac (Dr. Jama Musse Jama, PhD) waa xisaabyahan ku takhasusay xisaabta

<sup>ii</sup> Geedka: waa naanays ay Hadraawi saaxiibadiisu ugu yeedhi jireen.

<sup>iii</sup> Faaraxa Axmed Cali oo loo yaqaanno “Gammuute” waxa uu wax ku bartey kulliyaddii Waxbarashada ee Lafoole ee Jaamacadha Ummadda Soomaaliyeed. Waa cilmibaadhe ku fooggan baadhista iyo daraasaadka suugaanta soomaalida, gaar ahaan miisaanka maansada oo uu dhawaan ka soo saaray buugga cusub ee “COMING OF AGE: An Introduction to Somali Metrics” [Qaangaadh – hordhac miisaanka maansada], (2018). Faarax waxa uu caan ku ahaa muddo dheer qorista sheekoooyinka gaagaaban, ka dibna tirinta maansada, waxa se Faarax lagu yaqaannaa hadda cilmibaadhista ku saabsan miisaanka maansada.

<sup>iv</sup> Maxamed Ibraahin Warsame “Hadraawi” waa maansoyahan, mufaker ku xeeldheer aqoonta xerudhaladka ah ee Soomaalida, waxa na lagu tilmaamaa in uu yahay maansoyahanka ugu saamaynta badan ee Soomaalida. Hadraawi waxa uu ku guulaystay 2014kii abaalgudka sannadlahaa ah ee Prince Claus Award (The Netherlands). Maansoooyinkiisa waxa lagu ururiyey buuggiisa “Halkaraan: maansadii Hadraawi, 1970-1990”, (1993); iyo buugga “Halka haleel”, Maxamed Baashe X Xasan (2004, 2018). Waxa kale lagu turjumey suugaantiisa af ingiriisi qaybo ka mid ah oo ku soo baxay buugga “Hadraawi: the poet and the man”, isku dubbaridey Bill Herbert.

<sup>v</sup> Bandhigga Caalamiga ah ee Buugaagta Hargeysa (BCBH) waa barmaamij sannadle ah oo ka qabsooma Hargeysa xagaa kasta. Wuxuu soo bilaabmay 2008, waxana la gu soo bandhigaa buugaagta cusub, suugaanta iyo fanka wajiyadooda kala duwan, waxana ka dhaca doodo ku saabsan arrimaha kolba markaa taagan. BCBC waxa aasaasay oo sannad kastana iskudubba rida Dr. Jaamac Muuse Jaamac. Ka eeg [www.hargeysabookfair.com](http://www.hargeysabookfair.com).

<sup>vi</sup> Eeg Maxamed Ibraahim Warsama, (1993), bogagga 346-356.

<sup>vii</sup> Eeg tixraacan hore, bogagga 241-248.

<sup>viii</sup> Ururin Maansoooyin Faarax Axmed Cali “Gammuute”. Aan la daabicin wali, oo qoraaga waraaqdani sameeyey.

<sup>ix</sup> Eeg tixraacan hore.

<sup>x</sup> Ina Walanwal waa magac kale oo la yidhaahdo Maxamed Ibraahim Warsame "Hadraawi".

<sup>xi</sup> *Gadhyale* (2015) waa maanso gabay ah. Ka eeg Jama Musse Jama [Soo socda].

<sup>xii</sup> 'Geed' waa naanays ay saaxiibbadii Maxamed Ibraahim Warsame "Hadraawi" u yaqaanniin. Hadraawi agjooggiisu waa geed hadhkii hoos jooggiisa.

<sup>xiii</sup> Ina Walanwal waa Hadraawi.

<sup>xiv</sup> *Jalbeeb* (2016) waa maanso Dhaanto ah. Ka eeg Jama Musse Jama [Soo socda].

<sup>xv</sup> Ina Walanwal waa Hadraawi.

<sup>xvi</sup> *Gardhalad* (??) waa maanso Dhaanto ah. Ka eeg Jama Musse Jama [Soo socda].

<sup>xvii</sup> Ina Walanwal waa Hadraawi.

<sup>xviii</sup> *Xayi* (2018), waa maanso Geeraar ah. Ka eeg Jama Musse Jama [Soo socda].

<sup>xix</sup> *Geedku* waa Hadraawi (eeg sare)

<sup>xx</sup> *Caymo* (2020), waa maanso gabay ah. Ka eeg Jama Musse Jama (Soo socda).

<sup>xxi</sup> Geedku waa Hadraawi.

<sup>xxii</sup> Kulan waraysi ah oo aan 27/10/2018 kula yeeshay Faarax Axmed Cali "Gamuute" London.

<sup>xxiii</sup> Eeg, tusaale ahaan, sadarka 14aad. Qaabka loo bandhigay waa bilo la geliyey baydka maansada ama maahmaahda iyo astada, ku bilaabanta ereyga "tus.", baydka oo la galiyey astaanta xigashada, oo la raaciyeey abwaanka yidhi, la raaciyeey kolmo, oo lagu soo afjaray maansada ama tixraaca laga soo dheegay oo far jiifta ku qoran. Sida: (tus. "Haankiyo wadnaha biyaha habaya", Hadraawi: *Heego muuq dheer*).

<sup>xxiv</sup> Eeg tusaale ahaan sadarka 7aad: "Habili'i" waa laba erey "habi la'aan" oo marka la israaciyo uu abwaanku u jeedo "xusuus la'aan ama ogaansho la'aan, ama dhug la'aan".

<sup>xxv</sup> Eeg, tusaale ahaan, tuduca ka kooban sadarrada 34-36.

<sup>xxvi</sup> Waxaan u mahadcelinaya Rashiid Sheekh Cabdillaahi "Gadhwayne", Siciid Jaamac Xuseen, Maxamed Xirsi Guuleed iyo Giorgio Banti oo waraaqdan oo qabyo-qoraal ah akhriyey, talona ka soo jeediyeey.

<sup>xxvii</sup> Kolka loo eego habka tirinta alannada ee miisaanka maansada. Eeg Maxamed Xaashi Dhamac "Gaariye" (1976) marka uu ka hadlayo sida jiiftada loo miisaamo. Sidaa si leeg buu dhaantadana uga hadlay.

<sup>xxviii</sup> Xaraf-raaca maansada ku socotaa waa H.

<sup>xxix</sup> Sida uu qorey Faarax Gammuute Dhaantada asaliga ah waxa ka soo farcamay noocyoo badan oo maanso-badeed ah. Eeg Farah Ahmed Ali "Gammuute" (2018), bogga 160aad.

<sup>xxx</sup> *Kor-u-kac (lamb)* waa halbeeg miisaanka maansada oo ka kooban alan gaaban oo uu raaco alan dheer.

<sup>xxxi</sup> Rakaadka (*frequency*) erey-adeegsigu waa hab cilmi-afeedka loogu baadho sida uu qoraalku ereyada u kala dhawaysto, una adeegsado.

<sup>xxxii</sup> Isoggolaanshaha (*is-oggolaanshaha*) (*concordance*) erey waa adeegsida ereyga oo loo eegayo halka uu kaga jiro weedha.

<sup>xxxiii</sup> Kaydka AfSoomaaliga (somalicorpus.com) waxa sameeyey qoraaga waraaqdani waxa ku jira agab kala duwan ee xisaabinta cilmi-afeedka, oo lagu baadhi karo qoraalka Af Soomaaliga ah, kuuna fududeeya fahanka dhismaha ereyga. Agabkaas wax aka mid ah somConcor (barmaajir ku tusa isoggolaanshaha ereyga), WordPres. Eeg Jama Musse Jama (2016), *Unpublished PhD Thesis*.

<sup>xxxiv</sup> Meelaha qaarkood habkii qoraalka maansada waa laga beddelay oo si loo fahmo ayaa ereyada la israacayay la kala jaray (tus. "Higlo iyo kala firi, galool hawd" waxa ay ku saxan tahay "Higliyo kala firi, galool hawd", sidoo kale *Hiirta iyo (Hiirtiyo)*, *Haddo iyo (Haddiyo)*, *Hirka iyo (Hurkiyo)*, ikk)

<sup>xxxv</sup> Eeg Kaydka AfSoomaaliga ku qeexan iftiiminta xxxiii.